

Overview of Early Intervention Dispute Resolution Processes for Families of Infants & Toddlers (Birth to Age 3) (Guudmarka Nidaamka Xalinta Muranka ee Waxka Qabadka Hore ee Qoysaska Caruurta Socod Baradka & Sabiga ah (Dhalasho ilaa 3 jir)

***Loo sameeyay Gobolka Washinton oo laga soo qaataay Xarunta Xalinta Muranka Munaasabka ah ee Waxbarashada Gaarka ah**



CADRE (2018). Tilmaamaha Degdega ah ee CADRE ee Nidaamyada Xalinta Muranka Waxka Qabadka Hore ee Waalidka Caruurta Sabiga ah & Socodka Baradka ah (Dhalasho ilaa 2 Jir), Eugene, Oregon, CADRE. Taariikhda Baahinta: Sebteember 2018.

Process (Nidaamyada)	Mediation (Dhexdhexaadinta)	Administrative Complaint (Cabashada Maamulka)	Due Process Hearing (Wakhtiga Nidaamka Dhagaysiga)
Sida Looga Gudbo Kala Duwanaanshaha Fikirka	Nidaam ikhtiyaar ah oo dadka isku keena isaga oo uu la joogo dhex dhixaadiye dhaxaal ah, aqoon u leh oo lagu tobobaray, si uu uga caawiyo is fahansiinta, sheegitaanka tabashooyinka, iyo xalinta muranka.	Dalab qoraal ah oo loo isticmaalayo in loogu sheego bixiyaha adeega, hay'ada bixisa, hay'ada hogaanka gobolka, ama hay'ada shacab ee kale ee aan raacin Qaybta C ee IDEA, iyo in la dalbado xalinta gobolka.	Nidaamka loo isticmaalo xalinta cabashada ay xareeyeen waalidku.
Waa maxay Mushkiladu oo Maxaa Loo Isticmaalayaa	La isticmaalaa markasta oo uu jiro muran waalidka iyo Hay'ada Bixiyaha ama Bixiyaha Adeega oo la xidhiidha bixinta adeeg hoos yimaada Qaybta C ee IDEA. Waxaa la dalban karaa wakhti kasta, waxaa kamid ah kahor, ama marka nidaamka dhagaysiga la dalbato la taaban yahay, ama cabashada maamul la xareeyo.	La isticmaalaa marka ay su'aal ka taagan tahay hadii Qaybta E ee qawaaniinta IDEA la raacay iyada oo la eegayo ilme sabi/ socod barad ah iyo qoyskiisa ama arrimaha nidaamka gobolka.	Waxaa loo isticmaalaa xalinta muranka ee la xidhiidha aqoonsiga, qiiimaynta, ama meeleynta ilmaha socod baradka ah ama sabiga ah, ama siinta adeegyada waxka qabadka hore ilmaha sabiga ah iyo socodka baradka ah qoyskiisa.
Yaa Bilaaba	Xubin qoys, Bixiyaha Adeega, Hay'ada Bixiyaha, iyo/ama hay'ada shacabka ayaa dalban kara dhex dhixaadin. Ka qayb galku waa ikhtiyaar cid walba.	Wixii ruux ah ama hay'ad ah, xataa hal ka socda gobol kale, ayaa xarayn kara cabasho maamul.	Kaliya waalidka ayaa xarayn kara dalabka dhagaysiga nidaamka.
Natijjada ama Natijjada La Doonayo	Heshiis qoran, la saxeexay, oo sharci ah.	Go'aanka qoran oo ay kamid yihiin natijjada iyo gunaanadka, iyo liiska sababaha go'aanka ugu danbeeya. Hadii ay jiraan natijjoo in Qaybta C ee IDEA aan la raacin, warbixinta waa inay kamid tahay talaabo sixitaan oo loogu baahan yahay in lagaga jawaabo baahiyaha ilmaha sabiga/socod baradka ah iyo qoyska oo la xidhiidha cabashada.	Xogta natijjada iyo go'aano qoraal ah. Go'aanka waxa uu armi karaa talaabooyin gaar ah oo la qaaday.



Process (Nidaamkada)	Mediation (Dhexdhexaadinta)	Administrative Complaint (Cabashada Maamulka)	Due Process Hearing (Wakhtiga Nidaamka Dhagaysiga)
Nidaamka Kala Saarista	<p>Ka wada hadalka dhex dhexaadintu waa sir oo looma adeegsan karo nidaamka dhagaysiga ama dacwad madani.</p> <p>Dhex dhexaadintu waa nidaam dabacsan - ka qayb galayaasha waxay saamayn karaan nidaamka oo waxay marka danbe sheegi karaan natijjada.</p> <p>Dhex dhexadiiyayaashu ma gaadhi karaan go'aamada. Dhamaan ka qayb galayaashu waa inay ogolaadaan wixii go'aano ah ee lagu heshiiyay dhax dhexaadinta.</p>	<p>Tani waxaa weeye ikhtiyaarka kaliya ee xalinta muranka ee u furan ruux kasta ama hay'ad kasta, waxaa kamid ah cida aan qaraabada la ahayn ilmaha.</p> <p>Go'aanka ugu danbeeyaa waxaa kamid noqon kara talaabo sixitaan oo u gaar ah ilmaha ama la xidhiidha mushkiladaha balaadhan ee nidaamka.</p> <p>Ruuxa cabanayaa wixa uu fursad u heleaa inuu keeno macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan cabashooyinka. Macluumaadkan waxaa lagu bixin karaa afka ama isaga oo qoran.</p>	<p>Waalidiintu waxay xaq u leeyihii inay helena qoraalka hadalka oo qoran ama elektorooniig ah ee dhagaysiga, oo bilaash u ah waalidiinta.</p> <p>Go'aanka sarkaalka dhagaysiga waxaa loo adeegsan karaa maxkamada gobolka ama federalka.</p>
Gunooyinka	<p>Wada hadalku waa sir - waxaa laga dhax yiri dhex dhexaadinta looma isticmaalo karo cadayn ahaan nidaamka dhagaysiga ama dacwad madani.</p> <p>Dhex dhexaadintu waxay bixisaa dabacsanaan badan, iyo ikhtiyaaro saamayntooda xun ka yar tahay cabashada gobolka ee qoraalka ah ama nidaamka dhagaysiga.</p> <p>Mararka qaar ka qayb galayaashu waxay kala shaqeeyaan dhex dhexadiiyayaasha qaabaynta nidaamka. Mararka qaar, ka qayb galayaashu waxaa loo ogolaadaa inay wada doortaan dhex dhexadiiyaha.</p> <p>Dhex dhexaadintu waxay ka caawin kartaa xalinta muranka si dhakhso ah marka loo eego cabashooyinka gobolka ee qoran ama nidaamka dhagaysiga.</p>	<p>Go'aanka qoran waa in lagu soo saaraa ugu danbayn 60 maalmood kadib cabashada marka la helo, iyada oo wakhtiga loo dheereeyay moojee xaalad lama filaan ah oo ku saabsan cabashadaas gaarka ah.</p> <p>Cabashada maamulku way ka fududahay xaraynteedu.</p>	<p>Waxay bixisaa fursad lagu helo cid kale oo dhexaad ah oo go'aanka gaadha ay dhinacyadu xalin kari waayeen dhaxdooda.</p> <p>Laga bilaabo taariikhda cabashada nidaamka marka la xareeyay ilaa inta go'aanka kama danbaysta ahi uu soo baxayo, iyada oo bixiyaha/hay'adaha hogaaminaya iyo waalidku ku heshiiyaa moojee, ilmaha waa inuu sii wadaa qaadashada adeegyada waxka qabadka hore ee munaasabka ah ee lagu siinayo habdhismeedka lagu sheegey IFSP ee ay ogolaadeen waalidku.</p> <p>Hadii nidaamka cabashadu ku lugleedahay codsi adeegyo hore oo ku jira Qeybta C, cunugaaga waa in la siyyaa adeegyadaasi aan lagu muransaneyn.</p> <p>Iyada oo rafcaan laga qaato moojee, go'aanka sarkaalka dhagaysigu waa mid sharci ah ee ku saabsan bixiyaha/ hay'ada gobolka ee hogaanka iyo waalidka.</p>



Process (Nidaamyada)	Mediation (Dhexdhedaadinta)	Written State Complaint (Cabashada Gobolka ee Qoran)	Due Process Hearing Request (Dalabka Wakhtiga Nidaamka Dhagaysiga)
Tixgelinada	<p>Dhax dhedaadintu waa ikhiyaar, markaa xubin qoyska ah, bixiyaha EIS, hay'ada hogaanka iyo/ama hay'ada shacabku waa inay ogolaadaan ka qayb galka.</p> <p>Hadii ay jirto xalinta mushkiladaha, ama heshiis la abuuro, waxay ku xidhan tahay ka qayb galayaasha.</p> <p>Xaaladaha murugsan waxay u baahan karan madalo badan oo dhex dhedaadintu ah si looga heshiio.</p> <p>Ma jirto damaanad qaad in heshiis qoraal ah la abuuri doono.</p>	<p>Qofka ama hay'ada xaraynaya cabashadu waa inay sheegtaa xogta lagu xoojinayo cabashooyinka in IDEA aan la raacin sheegaya. Cabashada gobolka ee qoran waa in la saxeexaa. OGGOW: Ogolaanshaha waalidka ayaa loo baahan yahay si loo siyo xogta shahsii ahaaneed ee haybta sheegeysa cid kale.</p> <p>Nidaamkan uma baahna dadka ku lug leh inay isku dayaan xalinta muranka ee la iska kaashado. Laakiin, dhex dhedaadinta ayaa la heli karaa wakhti kasta.</p> <p>IDEA uma baahna on goboladu ay bixiyaan nidaamka rafcaanka ee go'aanka qoraalka ah. Hadii rafcaanka la ogolaado, mudo 60 malamood ah oo go'aanka ugu danbeeyaa ayaa markaa bilaabmi doonta. <i>Waydii hay'ada hogaanka gobolka wixii ikhiyaaro ah ee la heli karo.</i></p>	<p>Go'aanka waxaa gaadha sarkaalka dhagaysiga ee:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Maaha shaqaale hayada hogaanka ama adeeg bixiye barbaarineed oo ku lugle bixinta adeegyada barbaarinta ama daryeelka cunuga; • Ma leh dano gaara ama shaqo oo khilaafaya dhexdhedaadnimadiisa hirgalinta dacwada. <p>Hadii go'aanka sarkaalka dhagaysiga rafcaan laga qaato, go'aankaas lama fulin karo ilaa inta rafcaanka la samaynayo.</p> <p>Hay'ada hogaanka waxaa matali kara looyer. Hadii waalidku qabsato looyer, waxaa iska bixinaya waalidka.</p>
Go'aan gaadhaha	Ka qayb galayaasha, waxaa kamen ah waalidka ilmaha sabiga/socod baradka ah, ka wada shaqaynaya xalalka oo gacanta ku haya natijjada.	Gobolka ayaa ka masuul ah xaqiijinta in calashooyinka la xaliyo, oo go'aanka madaxa banaan laga soo saaro cabashada.	Waxaa loo isticmaala xalinta muranka ee la xidhiidha aqoonsiga, qiiimaynta, ama meeleynta ilmaha socod baradka ah ama sabiga ah, ama siinta adeegyada waxka qababka hore ilmaha sabiga ah iyo socodka baradka ah qoyskiisa.
Kaalinta Cida kale	<p>Dhex dhedaadiyaha caadiga ah:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Gacan ka gaystaa in ka qayb galayaasha ay sameeyaa shuruucda madasha. • Abuuuraan deegaan amaan ah oo ku dhiiri geliyan ka qayb galayaasha inay ka xushmeeyaa aragtida dadka kale. • Hagaa wada hadalka iyada oo uu dhagaysanayo, aqoonsiga danaha, iyo bayaaminta walaacyada. • Ma gaadho go'aano. • Yaqaanaa shuruucda la xidhiidha waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha. 	<p>Baadaha cabashada:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Akhrinta macluumaadka la xidhiidha cabashada. • Waxa uu waraysan karaa ama la kulmi karaa dadka la xidhiidha cabashada. • Waxa baadhi wax oo waxa uu ka gaadhi karaa go'aano ku saabsan sharciga waafaqsan. 	<p>Sarkaalka dhagaysi:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Kormeerka mudada dhagaysiga, waxaa kami dah dhamaan hawlahaa dhagaysiga kahor. • Qabtaa dhagaysiga oo waxa uu u maamulaa nidaamka wakhtiga loo baahan yahay. • Iisticmaala sharciga ku munaasabka ah go'aanka qoraalka ah ee waxa la sheegey iyo cadaymaha kale ee la keeney dhagaysiga. • Waxa uu meesha ka saari karaa nidaamka cabashada (dalabka dhagaysiga) hadii arrinta la xaliyo kahor dhagaysiga.
Mudada Wakhtiga	<p>Wakhti lama cayimin. Loogu baahan yahay in wakhti loo baahan yahay la mudeeyo.</p> <ul style="list-style-type: none"> • Dhex dhedaadintu lama isticmaali karo si loo diido ama dib loogu dhigo xuquuqda qoyska ee nidaamka dhagaysiga, ama si loogu diido wixii kale ee xuquuq ah ee hoos yimaadaa Qaybta C ee IDEA. 	<p>IDEA, cabashooyinka gobolka oo qoran waa in lagu xareeyaa hal sano gudahood oo ka bilaabma taariikhda marka shahsigu ogaaday ama ay ahayd in uu ogaado mushkilada.</p> <ul style="list-style-type: none"> • Go'aanka qoran waa in lagu soo saaraa 60 maalmood oo ka bilaabma taariikhda cabashada la xareeyay, iyada oo mudada la kordhiyo mojee xaaladaha qaar ama hadii dhinacyo ay ogolaadaan in la kordhiyo mudada wada shaqaynta ee nidaamka dhex dhedaadinta. 	<p>IDEA ma sheegaan mudada wakhtiga xaraynta. Waa muhiim in la xareeyo wakhtiga loo baahan yahay si loo xaqiijiyo in walaacyadaada ku saabsan adeegyada ilmahaaga si dhakso ah looga jawaabo.</p> <ul style="list-style-type: none"> • Dhagaysiga waa in la dhamaystiraa, oo go'aamada dhagaysiga lagu soo saaraa, 30 maalmood gudahood oo ka bilaabma taariikhda nidaamka cabashada la heley.

Process (Nidaamyada)	Mediation (Dhexdhexaadinta)	Written State Complaint (Cabashada Gobolka ee Qoran)	Due Process Hearing Request (Dalabka Wakhtiga Nidaamka Dhagaysiga)
Kharashka Dhaqaale/Cida Bixinaya	Kharash qoyska kuma taagna. Dhex dhexaadiyaha iyo daadihiyaha waxaa bixiya kharashkiisa dawlada.	Kharash qoyska kuma taagna. Baadhitaan ayaa la sameeyaa, oo go'aamada waxaa lagu gaadhaa kharashka dawlada.	Dhagaysiga, sarkalka dhagaysiga, daadihiyaha, iyo go'aanka waa inayna kharashkooda bixinin waalidku. Dhinac kasta waxa uu iska bixiyaa kharashkiisa, oo waxaa kamid noqon kara kharashka looyarka iyo kharashka markhaatiga.
Saamaynta Xidhiidhka	Dhex dhexaadiye waxa uu gacan ka gaysan karaa in si wanaagsan mushkilada loo xaliyo. Xidhiidh dhaamaa iyo hormarin xidhiidhka ayaa badanaa ka yimaada dhex dhexaadinta.	Nidaamkan diirada ma saaro xidhiidhada.	Nidaamka waxaa loo arkaa nidaamka xarinta muranka ugu dooda badan.
Sida Loogu Diyaar Garoobo Khayraad dheeraad ah ayaa laga heli karaa websaytka CADRE www.cadreworks.org	<p>Waxa gacan ka gaysan kara:</p> <ul style="list-style-type: none"> In la sameeyo liis arrimaha aad doonayso inaad ka hadasho iyo su'alaha aad doonayso inaad waydiiso. Ka fikir waxa ugu muhiimsan baahiyaha ilmahaaga iyo qoyskaaga. Diyaar u ahaw inaad dhagaysato oo aad si taxadir leh u eegto fikirada kale, iyo sidoo kale xalalka iman kara. Habee waraaqo, ku qor taariikhaha iyo qoraalada iyaga, oo keen nuqulo dheeraad ah oo aad dadka la wadaagto. Soo qaado xogta wax kaaga tari karta sharaxa ama u sheega wax dadka kale. Ka fikir sida aad u qorshaynayo inaad uga jawaabo caadifada inta kulanku socdo. Wakhti yar kahor kaalay kulanka, si markaa aad wakhti ugu hesho aad ku diyaar garawdo. 	<p>Ruuxa xaraynaya cabashu waa inuu:</p> <ul style="list-style-type: none"> Soo raaciyya dhamaan macluumaadka loogu baahan yahay si loogu xoojiyo dalabka in IDEA aan la racin marka cabashada la xaraynayo. Isla wakhtiga cabashada lagu xaraynayo Gobolka, cida cabanaya waa inuu siiyaa nuqul cabashada bixiyaha EIS, hay'ada hoganka gobolka ama hay'ada cabashada laga xaraynayo. Ka jawaab dhamaan dalabyada macluumaadka dheeraad ah ee ku saabsan cabashada wakhtiga loo baahan yahay. <p>Waxaa wanaagsan in la habeeyo dhamaan duwaanada ilmaha iyo waraaqaha kale iyo in loo diyaariyo bandhiga sida macluumaadkan loo tusayo in hay'ada ayna raacin shuruudaha.</p>	<p>Diyaar garaw wayn ayaa loogu baahan yahay in lagu soo bandhigyo kiiska si wanaagsan.</p> <p>Dhinacyada waa inay isku diyaariyaan kuwa soo socda dhagaysiga:</p> <ul style="list-style-type: none"> Isku keenista iyo gudbinta cadaynta Diyaarinta bayaanka, liiska markhaatiga, iyo waraaqaha kale ee dhagaysiga Su'aasha iyo markhaatiga waraysiga <p>Dhinacyada ayaa dooranaya hadii ay qabsanayaan iyo hadii kale looyer la taliya. Ruuxa aanu matalayn looyer waxaa loogu yeedhi karaa "pro se." Waa weedh Latin ah oo ka dhigan ruux isagu naftiisa matalaya ama nafteeda matalaysa dacwada sharcii.</p>

Heshiiska Wada Shaqaynta U.S. Department of Education Office of Special Education Programs (Xafiiska Waaxda Waxbarashada Maraykanka ee Barnaamijiyada Waxbarashada Gaarka ah) H326X130001. Tina Diamond, Ph.D., ayaa ah sarkalka mashruuca. Aragtiyaha lagu sheegey halkan kama turjumayaan aragtida ama siyaasadaha U.S. Department of Education (Waaxda Waxbarashada Maraykanka). Waaxda Waxbarashada Maraykanku ma xayaysiiso wax alaab ah, shixnad, adeeg ama shirkad lagu sheegey baahintan ee leh ujeedo ama la sheegey. Alaabtan waxaa iska leh shacabka. Ogolaanshaha dib u baahinta dhamaanteed ama qayb kamid ah waa la ogolaaday. Inkasta oo dib u daobicida baahintan aan loo baahnayn, waxaa laga tixraaca: CADRE (2018). Tilmaamaha Degdega ah ee CADRE ee Nidaamyada Xalinta Muranka Waxka Qabadka Hore ee Waalidka Caruurta Sabiga ah & Socodka Baradka ah (Dhalasho ilaa 2 Jir), Eugene, Oregon, CADRE. Taariikhda Baahinta: Sebteembar 2018.

Guudmarkan looguma talo gelin in la turjubo, wax laga bedelo, ama ay bedesho wixii IDEA Qaybta C ee nidaamka ilaalnta ama shuruudaha sharciga federalka ama gobolka.

Xarunta Xalinta Muranka Munaasabka ah ee Waxbarashada Gaarka ah

 (541) 359-4210

 cadre@directionservice.org

 www.cadreworks.org

DCYF ma takoorto waxayna usiisa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqidiada, xaalada guur, dhalashada, xaalada dhalasho ama soo geleyti, da'da, rabitaanka jinsiga ama aqoonsiga jinsiga, xaalada ciidanka hawlgbabay ama ciidan, xaalada hooyada naas nuujinaya, iyo jiritaanka laxaad la'aan jidh, dareen, ama maskaxeed ama isticmaalka ayda ama xayawaanka carbisan ee dadka haga. Haddii aad rabto nuqullo dhukumenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qeybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka communications@dcyf.wa.gov.